

Cudurka xididada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha mara – Macluumaad aad ka faa'iidayaan karto marka lagugu daaweyn doono Xarelto® (rivaroxaban)

Waxa macluumaadkan lagu siiyey sababta oo ah dhakhtarkaaga ayaa kuu qoray Xarelto si lagaaga daameeyo cudurka xididada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha mara. Macluumaadku waxa uu kaa caawin doona inaad cudurka fahamto iyo sababta ay muhiimka ugu tahay inaad Xarelto ugu qaadata sida laguugu qoray.

Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cudurka xididada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha mara ayaad la xidhiidhi kartaa dhakhtarkaaga ama soo gal www.benartarsjukdom.se.

Macluumaadka dhameystiran oo ku saabsan isticmaalka ka fiiri warqada baakada dawada la socota ama ka eeg www.fass.se.

Maxaan ugu baahanahay daaweynta?

Cudurka xididada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha mara waxa uu badanaa saameeyaa xididada dhiiga ee lugaha, xididada halbowlayaasha lugaha ku yaala, iyadoo markaa loo yaqaano cudurka xididada dhiiga ee lugaha.¹

Cudurku waxa uu ku bilaabmaa dufan ku sameysma gudaha xididdada kuwaas oo hoos u dhiga qeybinta dhiigga ee wadnaha. Waxa aad markaa yeelan doontaa calaamado sida xanuun lugaha marka muruqyada lugahu ay u baahan yihiin oksijiin ka badan waxa ay helayaan. Waxa badnaa la arkaa markaad dibada lugeynayso.¹ Cudurka waxa marmarka qaarkood loogu yeedhaa cudurka dadka daaqada wax ka daawada.

“Dadku ma fahmaan inaad xanuunsaneyso, waxay u malaynayaan inaad halkaas uun iska taagan tahay oo aad boodh daaqad yaala daawaneyso.”

Yaree khatarta

Mararka qaarkood ayay xinjir ku sameysantaa meesha dufanku ku sameysmay dusheeda markaas oo uu halbowlahu awdmo/xidhmo. Haddii ay taasi dhacdo ayaa qalliin loo baahan yahay si la iskugu dayo in dib loogu soo celiyo qulqulka dhiigga oo loogu yareeyo halista in la gooyo.^{2,3} Nasiib wanaag, ayaad adiga iyo dhakhtarkaagu iska caawin kartaan yareynta halista inay taasi kugu dhacdo.

Waayo Xarelto®?

Dhakhtarkaaga ayaa kuu qoray Xarelto iyadoo ay acetylsalicylsyra waheliso sida qeybta ka ah qorshaha daaweyntaada cudurka xididada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha. Ujeeddada taasi waa in la yareeyo halista inay xinjir ku samaysanto xididadaada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha.

Waa maxay Xarelto iyo acetylsalicylsyra?

Xarelto waa dawo yareyneysa halista ay xinjir ugu sameysmayso xididada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha iyadoo dhiigga ka dhigeysa mid waxyar ka khafiifsan. Acetylsalicylsyra ayaa sidaas oo kale dhiiga khafiif ka dhigeysa.

Maxaan labadaba ugu wada qaadanayaa?

Acetylsalicylsyra iyo Xarelto siyaabo kala duduwan ayey dhiigga ugu khafiifiyaan, waxaana ka fiican in labadooda la wada qaato halkii midkood uun laga qaadan lahaa.

Marka Xarelto iyo acetylsalicylsyra la isku darro ayay si ka fiican ugu yareyn kartaa halista faaliga, wadne istaaga iyo in xubin jidhka lagu gooyo haddii acetylsalicylsyra la isticmaalo uun.

Sidee ayey Xarelto® iyo acetylsalicylsyra u shaqeyaan?

Xarelto waxa ay dhimeysaa sameysanka shabakadaha fibriinka ah (shabakada sameysa xinjirta dhiigga) halka acetylsalicylsyra ay yareynayso firfircoonida nudaha dhiiga (unugyada ku dhaga shabakada). Wadajir ayay labadoodu ugu yareynayaan halista in xinjir ay ku sameysanto xididadaada halbowlayaasha ee lugaha iyo gacmaha.

Sidee ayaan u qaataa Xarelto® iyo acetylsalicylsyra?

Waxa aad u baahan tahay inaad Xarelto maalintii laba jeer qaadato, iyadoo acetylsalicylsyra aad hal jeer maalintii qaadaneysa. Waxa jira dhowr xeeladood oo aad isticmaali karto si aad ugu xasuusato inaad dawadaada qaadato. Ma wakhti isku mid ah ayaad had iyo jeer wax cuntaa? Mise waxa jira wax aad maalintii laba jeer isticmaasho (sida tusaale ahaan, cadaygaaga)

Acetylsalicylsyra 75 mg hal mar maalintii (subaxdii AMA fiidkii). **Xarelto 2,5 mg** laba jeer maalintii (subaxdii IYO fiidkii).

Marna ha qaadan laba daws oo Xarelto ah si aad ugu kabto dowskii aad hilmaantey/iilowday.

Muddo intee le'eg ayaan Xarelto® qaadanaa?

Inta ay leegtahay mudadda aad dawadaada qaadaneysa waxa go'aaminaaya dhakhtarkaaga.

Maxaa kale oo aan u baahanahay inaan ka ogaado qaadashada Xarelto®?

Kaadhka bukaanka

Waxa aad heli doontaa kaadh bukaan kaas oo shaqaalaha caafimaadka ogeysiin doona inaad dawada dhiiga khafiifisa qaadato. Tus kaas dhakhaatiirta oo dhan, dhakhaatiirta ilkaha iyo kalkaalisoooyinka caafimaadka ee ku daaweynaaya oo had iyo jeer siddo/qaado (tusaale ahaan, inaad ku ridato boorsada jeebka) haddii aad shil gasho ama aad degdeg/kadis ugu xanuunsato.

Maxaa kale oo aan sameyn karaa?

Xusuusnow inay aad muhiim u tahay inaad dawada sida uu dhakhtarkaagu kuugu qoran ugu qaadatid. Laakiin waxa aad sidoo kale xididdada halhalbowlayaasha ugu caawin kartaa siyaabo kale:³

- ◆ Sigaarka jooji
- ◆ Si joogto ah jimicsi ugu samee
- ◆ Miisaanka dhin, haddii aad u baahan tahay
- ◆ Cun raashin nafaqo/waxtar leh

Haddii qadar aad u badan oo Xarelto® ah aad qaadatid

Si deg deg ah ula soo xiriir daryeelka caafimaadka haddii aad qaadatay qadar badan oo kiniin ah? Khatarta dhiigbixista ayaa sii kordheysa haddii aad qaadato qadar badan oo Xarelto ah.

Waxyeeelooyinka/Saameynaha xunxun

Dhamaan dawooyinku waxay keeni karaan saameyno xunxun, laakiin dadka isticmaala oo dhami kuma wada dhacaan kuwaasi. La xiriir rugtaada caafimaadka wixii talooyin ah haddii uu tusaale ahaan dhiig kaa yimaado sanko, afka, kaadi mareenka ama caloosha/mindhicirka. Haddii uu dhiig badani kaa yimaado ama dhiigbax aan iskii iska joogsanaynin aad yeelato, waa inaad daryeel caafimaad oo degdeg ah raadsataa. Haddii wax xoogan ay caloosha, xabadku/laabto ama madaxa kaaga dhacaan waa inaad sidoo kale daryeel caafimaad oo degdeg ah raadsataa si aad ugu hubiso inaad laheyn dhiigbax gudaha ah. Daryeel caafimaad oo degdeg ah raadso xitaa haddii aad si aan caadi aheyn ugu dafiicsan tahay, aad leedahay daal, midabka oo isbedelay, dawakhaad, madax xanuun,

barar aan la garaneynin waxa keenay, neefta oo ku qabato, xabadka oo ku xanuuna ama xididka dhiigga oo koga/isku dhega, calaamad noqon karta dhiigbax.

Wada jir dawooyinka kale

Ha qaadan dawooyinka caabuqa/kacdoonka jidhka biiya sida tusaale ahaan Voltaren, Naproxen ama acetylsalicylsyra kale oo dheeraad ah adiga oon aan marka hore dhakhtarkaagu weydiin. Kiniiniyada xanuunka jabiya ee ay ku jiraan Paracetamol, tusaale ahaan Alvedon iyo Panodil ayaa Xarelto lala sii qaadan karaa. **Waa muhiim inaad dhakhtarkaaga u sheegtid wixii dawooyin kale ah ee aad isticmaaleysid, taas waxa sidoo kale ku jira dawooyinka warqad la'aanta lagu qaato iyo daawooyinka dhirta ah. Haddii aad isticmaasho dawooyinka diiqa biiya ee nooca SSRI, waa inaad sidoo kale dhakhtarkaaga u sheegtaa.** Dhakhtarkaaga ayaa go'aaminaaya sida aad daaweynta ugu sameynayso.

Xadeymaha

La xidhiidh dhakhtar.

- ◆ haddii aad xasaasiyad leedahay, ama jidhkaagu wax diido, sida rivaroxaban ama mid ka mid ah walxaha kale ee ku jira Xarelto
- ◆ haddii aad xoog u dhiig baxeyso, ama aad leedahay dhiigbax socda
- ◆ haddii aad qabtid cudurka beerka ama xaalad kale oo kor u qaadeysa halista dhiigbaxa
- ◆ haddii aad uur leedahay ama aad naaska nuujinayso
- ◆ haddii aad sameynasyo qalliin la qorsheeyay ama biopsi (hab cad tijaabo ah lagu soo qaado)

Dhakhtarkaaga ilkaha la xiriir haddii aad, tusaale ahaan ilig iska soo saaareyso oo iyaga u sheeg in Xarelto lagugu daaweynaayo. Sidoo kale dhakhtarkaaga la xiriir haddii aad qorsheynaysid inaad uur qaado.

FIIRO GAARA: Buugan yar ma beddelaayo talada iyo tilmaamaha aad ka helyso dhakhtarkaaga ama shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka.

Tixraaca:

1. Mayo Clinic. Peripheral artery disease (PAD). Symptoms and causes. Internetka: <https://www.mayoclinic.org/diseases-conditions/peripheral-artery-disease/symptoms-causes/syc-20350557> [markii ugu danbeysay la akhriyey 2020].
2. NHS Choices. Atherosclerosis (arteriosclerosis). Internetka: <https://www.nhs.uk/conditions/atherosclerosis/> [markii ugu danbeysay la akhriyey 2020].
3. Mayo Clinic. Peripheral artery disease (PAD). Sheegista cudurka iyo daaweynta Internetka: <https://www.mayoclinic.org/diseases-conditions/peripheral-artery-disease/diagnosis-treatment/drc-20350563> [markii ugu danbeysay la akhriyey 2020].

Xarelto (rivaroxaban), antitrombotiskt medel, **R** (B01 AF01). Tabletter 2,5 mg (F). **Indikation:** Xarelto, i kombination med acetylsalicylsyra, är avsett för att förebygga aterotrombotiska händelser hos vuxna patienter med kranskärlssjukdom eller symptomatisk perifer kärlsjukdom med hög risk för ischemiska händelser. **Dosering:** Den rekommenderade dosen är Xarelto 2,5 mg två gånger dagligen, i kombination med en daglig dos om 75–100 mg acetylsalicylsyra. Behandlingslängden ska fastställas för varje enskild patient baserat på regelbundna utvärderingar med hänsyn tagen till risken för trombotiska händelser kontra blödningsrisk. **Kontraindikationer:** Överkänslighet mot den aktiva substansen eller mot något hjälpämne. Aktiv, kliniskt signifikant blödning. Organskada eller tillstånd, som anses utgöra en ökad risk för större blödning. Samtidig behandling med andra antikoagulantia. Samtidig behandling av akut koronart syndrom i kombination med trombocyttagregationshämmande behandling hos patienter med tidigare stroke eller en transitorisk ischemisk attack (TIA). Samtidig behandling av kranskärlssjukdom/perifer kärlsjukdom med acetylsalicylsyra hos patienter med tidigare hemorragisk eller lakunär stroke, eller någon form av stroke inom en månad. Leversjukdom förknippad med koagulopati och kliniskt relevant blödningsrisk inklu-

sive cirrotiska patienter med Child Pugh B och C. Graviditet och amning. **Varningar och försiktighet:** Vid tillstånd med ökad blödningsrisk bör Xarelto användas med försiktighet. Administrering av Xarelto bör avbrytas om svår blödning uppstår. Xarelto ska användas med försiktighet hos patienter med kreatininclearance 15–29 ml/min. Användning av Xarelto hos patienter med kreatininclearance < 15 ml/min rekommenderas inte. Xarelto bör användas med försiktighet hos patienter med kranskärlssjukdom/perifer kärlsjukdom som är ≥ 75 år och samtidigt tar enbart acetylsalicylsyra eller acetylsalicylsyra och klopidoogrel eller tiklopidin. Nyttan och risken med behandlingen ska regelbundet utvärderas för varje enskild individ. Datum för senaste översynen av produktresumén december 2022. Bayer AB. Box 606. 169 26 Solna. Tel. 08-580 223 00. För ytterligare information samt priser se www.fass.se. Före förskrivning vänligen läs produktresumén på fass.se MA-M_Riv-SE-0142-3. December 2022.

Översättningen är utförd av *LanguageWire*, ett professionellt ISO9001:2015-certifierat översättningsföretag med kompetens att översätta från svenska till somaliska. Vi intygar härmed att denna översättning, enligt vår professionella kunskap, motsvarar dokumentet *Patientbroschyr (PAD)* på svenska.



Bayer AB
Box 606, 169 26 Solna
Tel: 08-580 223 00